



Markuu dhoho mu'addinku: Allaahu akbar Allaahu akbar, ee midkiin dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, haddana dhoho: Ashhadu allaa ilaaha illa Ilaah, uu ka daba dhoho: Ashhadu Allaa ilaaha illa Ilaah, haddana dhoho: Ashhadu Ana Maxamada rasuul Allaah, ee ka daba dhoho: Ashhadu ana Maxamada rasuul Allaah, haddana dhoho: xaya cala salaah, isna dhoho: laa xawla walaa quwata illaa billaah, hadana dhoho: xaya calal falaax, isna dhoho: laa xawla walaa quwata illaa billaah, haddana dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, isna ka daba dhoho: Allaahu akbar Allaahu akbar, haddana dhoho: laa ilaaha illallaah, isna ka daba dhoho: laa ilaaha illaa Allaah isagoy qalbiga ka tahay janaduu galayaa".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Aadaanku waa ogaysiin dadka la ogeysiinayo soo galida waqtiga salaada, erayada aadaanku waa erayo caqiidada rumaynta Ilaahay ku dhan yahay. Xadiiskan Nabigu scw wuxuu ku cadeyey inay sharci tahay qofku markuu aadaanka maqlo, in qofka maqlaya inuu yiraahdo sida mu`adinku leeyahay oo kale, oo hadii mu`adinku yiraahdo: "Allaahu akbar" qofka maqlaya wuxuu oran: " Allaahu akbar ", sidaasuu u wadayaa, markuu soo gaaro mu'addinku " xaya cala salaah ", xaya calal-falaax ", wuxuu oran qofka maqlayaa aadaanka: " laa xawla walaa quwata ilaa bilaah ". Wuxuukaloo cadeeyey Nabigu scw in qofka ka daba dhaha mu'addinka erayada aadaanka isagoy qalbi iyo daacad ka tahay inuujanada galayo. Macnaha Erayada aadaanku waa: " Allaahu akbar ": Ilaahay baa waxwalba ka wayn oo ka mudan. " Ashhadu ilaa ilaaha illaa Allaah ": ilaah xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn ma jiro. "Ashhadu ana Maxamada Rasuulu Allaah ": waxaan markhaati ka ahay oo ka qirayaa carabkayga iyo qalbigayga inuu Maxamad yahay Rasuul Ilaahay casa wajala soo diray, in la adeecona ay waajib tahay. "xaya cala salaah", u kaalaya salaada, hadalka qofka maqlaya aadaanka ee: "laa xawla walaa quwata ilaa billaah" waa: ma jirto xeelad gaara oo aanu kaga bixi karno wixii daacada naga hor joogsada, xoog iyo awoodna uma lihin aan shay ku samayno Ilaahay inuu nawaafahiyo mooyee. "xaya calal-falaax", u kaalaya asbaabta liibaanta, taasoo ah in lagu guulaysto janada lagana bad-baadada naarta.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

